

## Imika waa wakhtigii cunugaaga laga talaali lahaa Covid-19

Covid-19 waa xanuun noqon kara mid khatar badan. Xataa caruurta ayaa aad u qaadi kara xanuun daran. Dadka u dhaxeya da'da 12-15 ayaa hada heli kara talaalkooda. Talaalku wuxuu siinayaa difaac fiican waana u badqabaa caruurta iyo waayeelka. Talaalku waa bilaash. Haddii cunugu booqdo talaalka isagoon waalid la socon, iyada ama isagu wuxuu u baahan yahay inuu soo qaato foomamka la buuxiyey.

### Booqo xarunta booqashada bilaa balanta ama balan samee

Uma baahnid inaad balan sameysid marka hore. Dhamaan xarumaha talaalku way furan yihiin. Ka fiiri saacadaha shaqada [1177.se](https://www.1177.se).

Haddii aad rabtid, adiga iyo cunugaagu waxaad alan ka sameyn kartaan [1177.se](https://www.1177.se). Waxaad sidoo kale wici kartaa 018-6173500 si aad balan u sameysid.

Si talaalku u shaqeeyo, cingu wuxuu u baahan yahay inuu qaato labo irbadood oo talaalka. Ilaa afar todobaad waa inay kasoo wareegaan ka hor irbada labaad.

### Buuxi oo soo qaado foomamka

Si uu u helo talaalka, cingu wuxuu u baahan yahay inuu buuxiyo foomka cadeynta. Cadeynta caafimaadku waxay diyaar ku tahay shaybaadhka, lakiin waxay sidoo kale laga heli karaa [halkan](#) si loo daabacdo.

Haddii cunugu booqdo talaalka isagoon waalid la socon, iyada ama isagu wuxuu u baahan yahay inuu soo qaato foomka ogolaanshaha. Mid ama labada waalid ee korinaya cunugu waa inuu saxeexaa. [Halkan waxa ah foomka ogolaansha](#).

Haddii aad waalid ahaan raacdid cunugaaga, uma baahan doontid inaad soo qaadatid foomka ogolaanshaha.

### Xaqiiqooyinka talaalka

Wakaalada Caafimaadka ee Swedishku waxay leedahay [xaqiiqooyin badan oo khuseeya talaalka Covid-19](#). Waxaad wici kartaa 018-6174540 haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

### Smittskyddsenheten

Dag Hammarskjölds väg 60 | 751 85 Uppsala | tfn vx 018-611 00 00 | fax 018-55 29 01 | org nr 232100-0024

[www.regionuppsala.se](https://www.regionuppsala.se)